

Augusto 20, 2018

**TIXRAAC: Habraaca Xaq u Yeeladka Adeegyada Metro Mobility**

Metro Mobility waxa ay heshay dibna u eegay codsigaagii. Talaabadda xigta ee habraacu waa inaad adigu ka qayb qaadato Qiimeyn adigoo Xaadir ah lagugu sameeynayo. Waa khasab inaad nagu soo wacdo **21 cisho** gudahood ama kaba yar si aad u qabsato balanta qiimeynta ah, Hadii kale, waa aanu joojinaynaa hawsha codsiga oo dhan. Qiimeynta waxaa lagu sameyn doonaa Rugta Metro Mobility ee Adeega Macaamiisha ee St. Paul, MN (Metro Mobility Customer Service Center in St. Paul, Minn).

Qiimeyntan waxaa loogu tala galay in lagu soo aruuriyo akhbaar muhiim ah, oo gaar u ah adiga iyo xaaladaada caafimaad ama wixii lagaa helay, kuwaa oo naga caawinaya anaga in aan ogaano xaq u yeeladkaaga adeegyada ee uu dhigayo sharciga dowlada dhexe.

In kastoo qiimeyntani aysan ahayn baaritaan, waxaan u baahanahay in aad nala shaqeyso, oo aad ama adigu timaado ama qof qoyskaaga ahi uu yimaado qiimeynta si si sugar loogu fahmo xaaladaada caafimaad iyo wixii lagaa helay, iyo sidoo kale awoodaada quseeysa raacida gaadiidka Metro Mobility.

Si laguugu qabto balanta qiimeynta ah:

Wac **651-602-1111**

Mahadsannid,  
Qiimeeyaha Gaadiidka Naafada ee ADA ee Metro Mobility